# Leenka Cusub ee METRO G

## *Gaadiid kuwii hore ka dhaqsa badan ayaa ka soo shaqa galaya marinka Rice Street iyo Robert Street*


Dhismaha mashruuca gaadiidka basaska dheereeya ee Leenka METRO G (BRT) ayaa la qorsheeyay inuu bilaabmo dayrta 2026. Leenka G wuxuu si weyn ugu beddeli doonaa Jidka 62 iyo 68 isagoo ku bixinayo adeegyada maalinta dhan ah si ka dhaqsa badan sidoo hore oona joogto ah.

Leenka G wuxuu isku xiri doonaa bulshooyinka iyo goobaha loo socdo ee Little Canada, Maplewood, Roseville, St. Paul, iyo West St. Paul. Adeega baska dheereeya waxa uu safarkaaga baska ka dhigaa mid dhakhso badan oo xiiso leh isagoo ku samaynayo horumarino kala duwan.

Metro Transit waxay qorsheynaysaa inay furi doonta leenka G laba qaybood si ay si fiican ula shaqeyso dhismaha wadada la qorsheeyay.

Wajiga 1aad, oo imaanaysa 2027 waxa ku jiri , doona qaybta waqooyi ee Leenka G ee ka imanaya Little Canada Transit Station tagayana Robert & Kellogg oona ku yaala badhtamaha magaalada St. Paul north of the Mississippi River.

Wajiga 2aad, oo imaanaya 2028 waxa ku jiri , doona qaybta koonfureed ee Leenka G oona ka imanaya Robert & Fillmore ilaa Xarunta Dakota County Northern Service Center.




## *Safar sidoo hore ka dhakhsa badan*

Hal hadaf oo laga leeyahay Leenka G waa in laga dhigo adeega mid sidoo hore ka dhakhso badan oona la isku halayn karo. Waa kan sida:

- Basasku u yareeyaan joogsigooda, iyagoo si weyn u dedejiya wakhtiga safarka.
- Mashiinnada tigidhada ee yaala boosteejooyinka ay ugu oggolaadaan macaamiisha inay iibsadaan tigidhada ka hor intaysan la fuulin gaarig lacag caddaan ah ama kaarka kiridhitka.
- Basaska sagxadoodu gaaban tahay iyo jid gooyaha dhaadheer ee ku yaala boosteejooyinka, iyo albaabada baska ee ballaaran iyo ka soo fuulida qaybta hore iyo qaybta danbe, u dedejiyaan fuulitaanka.
- Kor u qaadida jid gooyada booteejada ay u beekhaamuso wakhtiga; basaska waxay si fudud u gali karaan wadada ka dib markay ku adeegaan boosteejo.
- Mudnaanta calaamadaha meelaha qaar ay u yareyn doonto dib u dhaca ay basaska kala kulmaan nalalka taraafikada.

## *Khibrada safarka la sii wanaajiyay*

Hoyga la horumariyay ayaa bixiya meel nabdoon oo ammaan ah oo lagu sugo baska, layskagana difaaco cimilada xun. Waxyaabaha uu qabo waxaa kamid ah:

- Macluumaadka ku saabsan jidka, nidaamka gaadiidka, iyo aaga ku xeeran
- Kamaradaha amniga iyo taleefannada loo isticmaalo xaaladaha degdega
- Iftiin la horumariyay
- Badhan la riixo marka diirimaad loo baahdo

**CIDA LAGALA XIRIIRAYO MASHRUUCA:**


Nasser Mussa, Isuduwaha Wacyigelinta
GLine@metrotransit.org


METRO
G Line

## *Jadwalka Mashruuca* *(Isuduwaha Wacyigelinta)*

- **2026-2028** — **DHISMO**
- **2027** — **FURITAANKA LA FILAYO EE LEENKA G (WEJIGA 1)**
- **2028** — **FURITAANKA LA FILAYO EE LEENKA G (WEJIGA 2)**

# *Waxa laga filan karo dhismaha*

Metro Transit waxay uga mahadcelinaysaa dadka deegaanka, ganacsatada, iyo macaamiisha inay dulqaad muujiyaan inta shaqaaluhu ay ka shaqaynayaan sidii ay Leenka METRO G ay ugu diyaarin lahaayeen bilaabida la filayo dhamaadka 2027 iyo 2028. Inta lagu jiro dhismaha, waxay u baahan kartaa waqtiyo ay waddooyinka xiran yihiin oo ay tahay inaad marto waddooyin kala duwan, waxaa laga yaabaa in qaybo ka mid ah meelaha ay dadka ku lugeeyaan in la xiro, waxaana dhici karta in mararka qaarkood ay dhacaan dhawaaqyo cod dheer ah. Dadku waa inay filaan:

- In dhismaha isgoys kasta guud ahaan uu ku jiri doono qaybo cusub oo waddooyin iyo meelo lagu lugeeyo, isbeddello lagu sameeyo calaamadaha taraafikada, iyo rakibidda hoy cusub iyo qalabyada kale ee boosteejada.
- Goobaha qaar inay ku jiri doonaan shaqada tasiilaadka iyo hagaajinta meelaha ay dadka ku lugeeyaaan. lagu wado baaskiilka. Horumarinta wadooyinka baaskiilada ayaa sidoo kale lagu daray boosteejooyinka qaar.
- Xiritaanka waddooyinka oo dhan wuxuu socon doonaa ilaa 21 maalmood boosteejooyinka qaarkood. Hal jiho oo keliya ayaa gaadiidka laga xiri doonaa markiiba, waxaana sidoo kale jiri doona xayiraado dheeraad ah oo leenka lagu sameeyo muddo dheer.
- Kooxda wacyigelintu waxay la hadli doonaan dadka ku nool, ka shaqeeya, ama hantida ku leh aagga wax yar ka hor inta aanu dhismuhu ka bilaabanin boosteeja kasta.
- Had iyo jeer waxaanu u oggolaan doonaa ugu yaraan hal dhinac oo ka mid ah goobta dhismaha inay dadka ku lugeeyaan.
- Waxaa loo oggolaan doonaa inay dadka u maraan guryahooda iyo ganacsiyadooda.
- Basaska ayaa meelo kala duwan laga weecin doonaa inta uu mashruucu socdo. Macluumaadka cusub waxaa laga heli karaa barta metrotransit.org/alerts.
- Shaqaaluhu waxay dhigi doonaan tuubooyin dhulka hoostiisa ah oo loogu talagalay shabakad fiber optic ah oo ku taal marinka oo dhan si ay ugu xidhmaan tiknoolajiyada boosteejooyinka.

## *Jidka Bask La Beddelay*

- Jidadka 62 iyo 68 ayaa meelo kala duwan laga leexin doonaa inta uu mashruucu socdo.
- Basaska waxaa loo weecin doonaa isgoysyada dhismaha, meelaha qaarna waxaa laga yaabaa in lagu isticmaalo joogsiyo ku meel gaar ah.

## *Ahoow xog ogaal*

**Wixii ah macluumaadka macluumaadka guud ee mashruuca:** metrotransit.org/g-line-project

**Si aad u hesho tafaasiisha akhbaaraad ku saabsan isbeddelada ku yimaadda jidada baska:** iska qor Digniinada loo soo diro Rakaabka barta metrotransit.org/alerts

**Macluumaadkii ugu dambeeyay ee ku saabsan dhismaha:** iska qor G Line update emails

## *Nala soo xiriir haddii aad qabtid walaacyo, su'aalo*

**Khadka lagala xiriiro qolada dhismaha:**
651-240-3688

**Iimaylka wacyigelinta:**
GLine@metrotransit.org

**Ma u baahan tahay turjubaan?**
Español, Hmoob, Soomaali, Oromoo, Karen

- Wac 612-373-3333, Dooro Xulashada 2
- Sheeg luuqada: Español, Hmoob, Soomaali, Oromoo, Karen